education northwest | AIR® Advancing Evidence. Improving Lives.

QIIMEYNTA HANNAANKA SEATTLE PRESCHOOL PROGRAM

Hirgelinta Fasalada Gaarka ah ee SPP iyo Qaababka Xannaanada Carruurta Qoyska

Department of Education and Early Learning (DEEL, Waaxda Tacliinta iyo Waxbarashada Dhallaanka) ee Seattle waxay daahfurtay Seattle Preschool Program (SPP, Barnaamijka Dugsiga Barbaarinta ee Seattle) sanadki 2015. SPP waxay bixisaa jawi waxbarasho oo caddayn ku salaysan, sinnaanta diiradda saara, oo dhaqan ahaan ka jawaabaya iyagoo la kaashanaya daryeel bixiyaasha dugsiga barbaarinta ee magaalada oo dhan.

Sanadkii 2024, DEEL waxay la shuraakowday Education Northwest iyo American Institutes for Research® si ay u qiimeyso hirgelinta saddex qaabab fasal oo SPP ah: dual language initiative (DLI, hindisaha labo luuqadood), special education inclusion (SPP Plus, ka mid noqoshada waxbarashada gaarka ah), iyo family child care (FCC, xannaanada carruurta qoyska). Soo koobidaan waxay soo bandhigaysaa natiijooyin la xushay oo ka soo baxay qiimeynta (ka eeg warbixinta dhammeystiran si aad uga hesho natiijooyin aad u faahfaahsan).

Talada bulshada

Si loo xaqiijiyo qiimeynta in ay ka tarjumto ahmiyadaha iyo aragtiyada bulshada, kooxda qiimeynta waxay la shaqeysay guddi la-talin oo ka kooban xubnaha bulshada, agaasimayaasha barnaamijka, macalimiinta dugsiyada barbaarinta, tababarayaasha, iyo shaqaalaha tacliinta sare. Guddiga la-talinta waxa uu ahaa la-hawlgale qiimo badan ugu fadhiya naqshadaynta qiimeynta, dib-u-eegista cabbirada iyo su'aalaha, iyo qaabaynta natiijooyinka.

Waxa aan samaynay si aan waxbadan uga ogaano

Kooxda qiimeyntu waxay wax ka baratay qaababka DLI, SPP Plus, iyo FCC iyagoo qabanaya waraysiyo, kooxaha diirada, dib-u-eegisyada dukumiintiyada, iyo booqashooyinka goobta. Waxaan sidoo kale

isticmaalnay xogaha ra'yi ururinada, Classroom Assessment Scoring System (CLASS, Nidaamka Buundo Siinta Imtixaanka Fasalka),[1] iyo Teaching Strategies Gold (TSG, Qiimeynta Xeeladaha Waxbarashada)[2] si aan u qeexno tayada fasalka iyo natiijooyinka carruurta.

Wareysiyada iyo kooxaha diiradda. Kooxda qiimeynta waxay wareysatay sagaal maamule barnaamij si ay wax uga ogaadaan sifooyinka muhiimka ah ee qaababka fasalka ee DLI, SPP Plus, iyo FCC. Kooxdu waxay sidoo kale qabatay 13 kooxo diirad oo ka kooban 19 xubno qoys, 32 barayaal, iyo toddobo tababare oo DEEL ah si ay u ogaadaan aragtiyadooda ku saabsan faa'iidooyinka, awoodaha, iyo tallooyinka kor loogu qaadayo qaabka fasal kasta.

Dib-u-eegisyada dukumiintiyada. Waxaan dib u eegnay siyaasadaha, habraacyada, iyo dukumiintiyada hagista si aan wax uga ogaano hirgelinta qaabka fasal kasta.

Booqashooyinka Goobta. Kooxda qiimeynta waxay indho-indhaysay dhaqamada waxbarasho iyo jawiyada fasalada ee saddex fasal oo DLI ah, lix fasal oo SPP Plus ah, iyo labo barnaamij oo FCC ah si ay u eegaan sida qaab kasta looga hirgeliyay fasalada ku kala duwanaa tayada hirgelinta, goobta, iyo sifooyinka carruurta.

Sifooyinka fasalka, tayada hirgelinta, iyo xogta natiijada ilmaha. Qaabka fasal kasta, waxaan falanqaynay xogta soo socoto si aan u qeexno sifooyinka fasalka, tayada hirgelinta, iyo natiijooyinka ilmaha.

- **Sifooyinka fasalka.** Kooxdeenu waxay qeexday diiwaangelinta carruurta, isirka/qowmiyadda, luuqadda guriga looga hadlo, iyo dakhliga qoyska. Waxaan sidoo kale ka warbixinay tirada macalimiinta oo ay la socoto shahaadooyinkooda, isirka/qowmiyadda, iyo asallada luuqadahooda.
- **Tayada hirgelinta.** Waxaan isu barbardhignay dhibcaha CLASS ee 2023–24 ee qaabka fasal kasta iyo isbarbardhigga fasallada aan loo qoondayn DLI, SPP Plus, ama FCC. Kooxdeenu waxay falanqaysay xogta ra'yi ururinta ee qoysaska, macalimiinta, iyo agaasimayaasha si ay uga caawiso in ay cabbirto hirgelinta ku habboon ee nooc kasta oo fasal ah iyadoo la isticmaalayo liiska hubinta daacadnimada hirgelinta ee ay soo saareen kooxda qiimeynta iyo DEEL.
- **Natiijooyinka canugga.** Waxaan falanqaynta xiriirka u adeegsanay in aan wax uga barano xiriirada u dhexeeya DLI ama SPP Plus iyo TSG iyo dhibcaha WaKIDS, anagoo koontaroolayna arrimaha kale sida sifooyinka tirakoobka carruurta ama u-qalmitaanka taageerooyinka waxbarashada. Falanqaymahaan looma qaban fasalada FCC ayadoo ay ugu wacan tahay tirada yar ee carruurta.

[1] Qiimeynta CLASS waa aalad loo isticmaalo in lagu qiimeeyo tayada fasalka ee saddex aag: taageerada shucuurta, abaabulka fasalka, iyo taageerada waxbaridda.

[2] TSG waa qiimeyn cabbirta koritaanka iyo kobaca carruurta yaryar ee xagga bulshonimada-shucuurta, jirka, luuqadda, garaadka, akhris-qoraalka, iyo xirfadaha xisaabta.

Natiijooyinka muhiimka ah ee fasallada DLI

Sanad dugsiyeedki 2023–24, SPP waxay taageertay 22 fasal oo DLI ah oo 359 canug siiyay waxbarashada labo luuqadood oo lagu baranayay sagaal luuqadood oo diiradda la saarayay: Luuqada Dhagoolka ee Maraykanka, Amxaari, Kantoniis, Faransiis, Mandarin, Soomaali, Isbaanish, Tagalog, iyo Fiitnaamiis. Fasalada DLI waxay adeegsadaan manhajka Soy Bilingüe, oo ah qaab awoodda ku salaysan oo labo luuqadood wax lagu barto.

Fasalada DLI waxay diiwaangeliyaan carruur badan oo Aasiyaan ah iyo kuwo luuqado badan ku hadla waxayna leeyihiin macalimiin badan oo luuqado badan ku hadla. Sanad dugsiyeedki 2023–24, barnaamijyada DLI waxay lahaayeen qeyb carruurta Aasiyaanka ah oo ka badan fasallada kuwa aan ahayn DLI, kuwa aan ahayn SPP Plus, iyo kuwa aan ahayn FCC (31% marka loo barbardhigo 15%), iyo sidoo kale qeyb badan oo carruurta luuqadaha badan ku hadla ah (63% marka loo barbardhigo 40%) iyo macalimiinta luuqadaha badan ku hadla (78% marka loo barbardhigo 40%). Ku dhawaad hal ka mid ah afarti canug (27%) oo dhigata fasallada DLI wuxuu ku hadlay luuqada diiradda fasalka marki uu joogay guriga.

Fasallada qaarkood waxay muujiyeen boos koritaan si ay u buuxiyaan jawiyada fasalka ku habboon iyo dhaqamada waxbaridda. Fasallada badankooda waxay muujiyeen hirgelin ku filan ama aad u wanaagsan oo la xiriirta cabbirada hirgelinta badankooda; si kastaba ha noqotee, inta badan fasallada, wax ka yar 50% ka mid ah carruurta diiwaangashan waxay ku hadleen luuqadda diirada la saarayay marki ay joogeen guriga. Sanad dugsiyeedki 2023–24, fasallada DLI waxay lahaayeen celceliska dhibcaha CLASS oo la mid ah sida fasallada kuwa aan ahayn DLI, kuwa aan ahayn SPP Plus, iyo kuwa aan ahayn FCC xagga abaabulka fasalka (6.2 labadaba) iyo taageerada shucuurta (6.5 labadaba) balse dhibco hoose xagga taageerada waxbarashada (3.0 marka loo barbardhigo 3.3).

> **"Wiilkayga maalin kasta waxa uu ku soo laabtaa guriga kadibna wuxuu ku heesaa Shiinees. Waa ay iga yaabisay. Marki aan ahayn [carruur], waxaan baranay isla heestaas."**
>
> **– Xubin qoys**

Fasallada DLI ayaa muujiyay waafaqsanaanta dhaqamada caddaynta ku salaysan marar badan. Inti lagu guda jiray booqashooyinka goobta, macalimiintu waxay kor u qaadeen horumarinta luqadda, halka macalimiinta qaar ay casharka la xiriiriyeen asallada ay ka soo jeedaan carruurta. Kooxaha diiradda, macalimiinta qaar waxay la wadaageen walaacyo ku saabsan sii haysashada macalimiinta iyo qiimeynta ilmaha. Qoysas badan waxay kooxaha diiradda ka sheegeen in fasalka DLI uu qadariyay uuna maamuusay asaladooda dhaqan korna uqaaday luuqadda iyo xirfadaha bulsho ee ilmaha.

Fasallada DLI ayaa muujiyay natiijooyin canug oo ka sarreeya ama la mid ah. Carruurta dhigata fasallada DLI waxay gaareen bartilmaameedyada koritaanka TSG heerar isku mid ah inta badan (jaantuska 1). Carruurta dhigata fasallada DLI waxay sidoo kale lahaayeen heer sare oo buuxinta dhammaan lixda filasho ee sida weyn loo qabay ah marka loo barbardhigo carruurta dhigata fasallada aan ahayn DLI, aan ahayn SPP Plus, iyo non-FCC. Ardayda dhigata dugsiga barbaarinta ee uqalma adeegyada bartaha Ingiriiisiga

ee Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle, kuwa horay u dhigtay fasallada DLI waxay lahaayeen natiijooyin u diyaarsanaanta dugsiga barbaarinta ah oo la mid ahaa kuwa dhigtay fasallada SPP ee aan ahayn DLI, SPP Plus, ama FCCs.

Jaantuuska 1 aad. Carruurta dhigata fasallada DLI waxay gaareen bartilmaameedyada koritaanka TSG heerar ka sarreeya afar ka mid ah lixda dhinac oo ka sarreeya carruurta dhigata fasallada la barbardhigga ah, 2023–24



Fiiro gaar ah: Fasallada barbardhiga waxaa loogu yeeraa fasallada aan ahayn DLI, aan ahayn SPP Plus, iyo kuwa aan ahayn FCC ee ku jira barnaamijka SPP. Qeybta jireed waxay ahayd qeybta kaliya ee lahayd tirokoob ahaan kala duwanaansho weyn oo xagga heerarka gaarista bartilmaameedyada koboca ah.

Isha: Falanqeynta qoraaga ee xogta Seattle Department of Education and Early Learning TSG.

Natiijooyinka muhiimka ah ee fasallada SPP Plus

Fasallada SPP Plus waxay bixiyaan deegaano waxbarasho oo loo dhan yahay halkaasoo carruurta leh individualized education program (IEP, barnaamijka waxbarashada gaarka ah) iyo carruurta caadi ahaan u koraysa ay wadajir wax ugu bartaan fasalka dugsiga barbaarinta. Sanad dugsiyeedki 2023–24, SPP waxay taageertay 28 fasallada SPP Plus ah oo ay wax ku baranayeen 510 ilmo, oo boqolkiiba 27 ka mid ah ay lahaayeen barnaamijyada IEP.

> **"Waxaan aragnay isbeddel habdhaqan oo weyn oo ku yimid wiilkeyga ... Waxay ila tahay inay sabab u tahay awoodda uu u leeyahay inuu dib-u-jiheeyo waxqabad ujeedo leh, ula kac ah isagoo maskaxda ku haya waxqabadyada uu doorbido."**
>
> **– Xubin qoys**

Fasallada SPP Plus waxay diiwaangeliyeen carruur leh sifooyin la mid ah kuwa fasallada kale ee SPP. Ka koobnaanta isirka/qowmiyadda ee carruurta iyo macalimiinta fasallada SPP Plus waxay la mid ahayd noocyada kale ee fasallada SPP, inkastoo boqolkiiba inta carruurta ku hadasha luuqadaha badan ay ahayd mid ka hooseysa. Fasallada SPP Plus waxay diiwaangeliyaan labo ilaa shan canug oo ka yar fasallada kale ee SPP, oo shan ilaa toddobo ka mid ahna carruurta la diiwaangeliyo waa in ay leeyihiin IEP. Fasallada SPP Plus badankooda waxay ku dhex yaalaan dugsiyada hoose ee Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle. Inta soo hartay waa qayb ka mid ah University of Washington Haring Center for Inclusive Education.

Fasallada SPP Plus waxay muujiyeen heerar sare oo tayada ah iyo daacadnimada hirgelinta inta badan cabbirada. Sanad dugsiyeedki 2023–24, fasallada SPP Plus waxay lahaayeen dhibco celcelis oo sare dhammaan saddexda dhinac ee CLASS marka loo barbardhigo noocyada kale ee fasallada SPP. Fasallada SPP Plus waxay diiwaangeliyaan tiro lagu taliyo oo ah carruur leh IEP, jawaab-celin wanaagsan ka haysta qoysaska, oo celcelis ahaan leh xubno shaqaale oo ka badan noocyada kale ee fasallada.

SPP plus ayaa muujinayay waafaqsanaanta dhaqamada caddaynta ku salaysan iyo boos horumar ah meelaha qaar. Inti lagu guda jiray booqashooyinka goobta, macalimiinta waxay adeegsadeen habab canugu udub-dhexaad u yahay sida waxbaridda ciyaarta ku salaysan taasoo dhiirigelisay ka qeybgalka canug kasta, isdhexgalka bulshada, iyo ka mid noqoshada hawlaha waxbarashada. Kooxaha diiradda qoysaska SPP Plus waxay sheegeen in carruurtooda naafada ah iyo kuwa aan naafada ahayn ay dareemeen ka-tirsanaansho,

ay xoojiyeen xirfadaha cilaaqaad-dhiska ayna fursado u heleen inay wax ka bartaan aqbalaada kala duwanaanshiyaasha. Dhinacyada hagaajinta waxaa ka mid ah hababka isdiiwaangelinta, adeegsiga xogta si loogu xogsiiyo go'aamada, iyo ku soo dhaweynta qoysaska inay ku lug yeeshaan fasalkooda iyo midba midka kale. Macalimiinta waxay sidoo kale iftiimiyeen baahi loo qabo iswaafajinta u dhaxeysa tababarsiinta iyo tababarka la bixiyo.

Fasallada SPP Plus waxay lahaayeen natiijooyin ilmo oo sare dhinacyada badankooda. Sanad dugsiyeedki 2023–24, carruurta dhigatay fasallada SPP Plus waxay lahaayeen dhibcaha gu'ga TSG oo sare iyo boqollay sare oo ah gaarista bartilmaameedyada kobaca TSG marka loo barbardhigo fasallada barbardhigga (jaantuuska 2 aad). Si kastaba ha noqotee, fasallada SPP Plus waxay lahaayeen heer wax yar ka hooseeya carruurta gaartay filashooyinka sida weyn loo qabo ee TSG ee dhammaan lixda dhinac marka loo eego fasallada barbardhigga. Ardayda dugsiga barbaarinta ee Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle dhexdooda kuwa leh iyo kuwa aan lahayn IEP labadaba, carruurta horay u soo dhigatay fasallada SPP Plus waxay lahaayeen heerar sare oo u diyaarsanaanta dugsiga barbaarinta ah sanad dugsiyeedkii 2023–24 marka loo barbardhigo kuwa dhigtay noocyada kale ee fasallada SPP.

Jaantuuska 2 aad. Boqollay sare oo ka mid ah carruurta dhigatay fasallada SPP Plus waxay gaareen yoolalkoodi koritaanka ee TSG marka loo eego fasallada barbardhiga, 2023–24



Fiiro gaar ah: Fasallada barbardhigga waxaa loogu yeeraa fasalladii aan ahayn DLI, SPP Plus, ama FCC.

Isha: Falanqeynta qoraaga ee xogta Seattle Department of Education and Early Learning TSG.

Natiijooyinka muhiimka ah ee fasallada FCC

Bixiyayaasha FCC waxay qoysaska siiyaan marin-u-helka fasallo leh da' isku dhafan oo leh saami yar oo ilmaha iyo macalinka ah iyo diirad saarka iswaafajinta dhaqanka iyo luuqadda. Labo xarumood (oo ay maamulaan BrightSpark iyo iskaashi u dhexeeya Voices of Tomorrow iyo Tiny Tots Development Center) ayaa isku dubarida hirgelinta SPP ee 22 goobood oo FCC ah. Sanad dugsiyeedki 2023–24, goobaha FCC waxay u adeegeen 99 ilmaha.

> **"Waxa gaarka ka dhiga [FCC-yada] waa ... fasalka tirada yar ... iyo sidoo kale ikhtiyaar kale siinta qoysaska, gaar ahaan qoysaska soogalootiga, halkaas oo ay rabaan in ilmahooda ay ku dhaganaadaan dhaqankooda."**
>
> **– Xog-bixiye muhiim ah**

Qeyb badan oo ka mid ah carruurta FCC iyo macalimiinta waa kuwo luuqado badan ku hadla iyo Madow. Ku dhawaad boqolkiiba 75 ka mid ah carruurta laga diiwaangeliyay FCCs sanad dugsiyeedki 2023–24 waxay ahaayeen Madow, marka loo barbardhigo boqolkiiba 24 ee dhigata fasallada aan ahayn DLI, kuwa aan ahay SPP Plus, iyo kuwa aan ahayn FCC. Boqolkiiba shan iyo konton ka mid ah carruurta FCC waxay ahaayeen kuwo luuqad ahaan kala duwan marka loo barbardhigo 40 boqolkiiba SPP oo dhan. Macalimiinta dhexdooda, 78% ka mid ah macalimiinta FCC waxay ahaayeen Madow marka loo barbardhigo 39% ee fasallada kale. Ku dhawaad 40% ka mid ah macalimiinta waxay sheegeen inay ku hadlaan Oromo, Soomaali, ama Tigrinya.

FCCs waxay lahaayeen dhibco CLASS hoose oo kala duwanaansho badan leh. Sanad dugsiyeedki 2023–24, celceliska dhibcaha CLASS waxay wax yar ka hooseeyeen FCCs dhexdooda marka loo eego noocyada kale ee fasallada SPP. Waxaa sidoo kale jiray kala duwanaansho weyn oo u dhexeeyay fasallada FCC.

FCCs waxay abuuraan jawi waxbarasho oo taageera shucuurta waxayna buuxiyaan filashooyinka qoyska. Intii lagu guda jiray indho-indheynta goobta, jawiga diiran iyo soo dhaweynta ayaa muuqatay, macalimiintuna waxay ahaayeen kuwo aad uga jawaaba baahiyaha carruurta. Filashooyinka habdhaqanka waxay ahaayeen kuwo iswaafaqsan carruurta oo dhan, halka la-qabsiyada iyo taageerada bulshonimada iyo shucuurta ay ahaayeen kuwo shakhsiyaysan iyadoo looga jawaabayo baahiyaha waxbarasho ee carruurta. Qoysaski kaqeybqaatay kooxaha diiradda waxay ka mahadnaqeen badbaadada, istareexa, iyo jawiga joogtada ah ee ay FCC siisay ubadkooda. Waxay sidoo kale sheegeen in bixiyaha FCC gacan ka siiyay in ay carruurtooda u diyaargaroobaan dugsiga barbaarinta.

Barayaasha ayaa ka mahadnaqay taageerooyinka tababarka waxayna codsadeen ku habboonayn iyo taageero dheeraad ah. Xubnaha shaqaalaha iyo macalimiintii la wareystay waxay xuseen in taageerooyinka tababarsiinta iyo tababarka ay noqon karaan kuwo ku habboon waaqaca FCC. Daryeel bixiyaasha qaarkood waxay codsadeen tababar dheeraad ah oo ah dhinacyada sida taageerista carruurta qaba xanuunada maskaxda.

FCCs waxay leeyihiin natiijooyin hoose oo koritaanka TSG ah marka loo barbardhigo qaababka kale ee fasalka. Sanad dugsiyeedki 2023–24, carruurta FCCs waxay lahaayeen celcelis sare oo dhibcaha cabbirka TSG ah ee gelitaanka marka loo eego fasallada aan ahayn DLI, aan ahayn SPP Plus, iyo kuwa aan ahayn FCC. Si kastaba ha noqotee, dhammaan dhinacyada oo dhan, boqollay hoose oo ka mid ah carruurta ku jirta barnaamijyada FCC ayaa gaaray yoolalka koritaanka (jaantuus 3).[3]

Jaantuuska 3 aad. Boqollay hoose oo ka mid ah carruurta ku jirta barnaamijyada FCC ayaa gaaray yoolalka koritaanka TSG ee dhammaan dhinacyada marka loo barbardhigo carruurta ku jirta fasallada barbardhigga, 2023–2024



Fiiro gaar ah: Fasallada barbardhigga waxaa loogu yeeraa fasalladii aan ahayn DLI, SPP Plus, ama FCC classrooms.

Isha: Falanqeynta qoraaga ee xogta Seattle Department of Education and Early Learning TSG.

[3] Sanad dugsiyeedkii 2023–24, tani waxaa ay ahayd 77 canug oo ka mid ah 99. Kuwani waa heerar kaqeybgal oo hoose (63 iyo 78%) marka loo eego fasallada DLI iyo SPP Plus dhexdooda (88 iyo 86%).

Tallooyinka loo xushay fasallada DLI, SPP Plus, iyo FCC

- **Ballaarinta aqoonta iyo adeegsiga xeeladaha wax ku baridda labada luuqad ee DLI iyo dhaqamada ka mid noqoshada SPP Plus ee nidaamka SPP, iyadoon loo eegin nooca fasalka.**
- **Iswaafajinta taageerada tababarsiinta iyo tababarka ee nidaamka SPP oo dhan iyo taageero ku-habboonaynta noocyada fasallada gaarka ah iyo heerarka xirfada macalinka.**
- **Xoojinta hirgelinta manhajka iyo adeegsiga dhaqamada waxbaridda ee caddaynta ku salaysan (sida is-dhexgalka macallinka iyo carruurta oo tayo sare leh) iyo dhaqamada diirada saara sinnaanta, gaar ahaan macallimiinta cusub iyo daryeel bixiyaasha FCC.**
- **Hagaajinta taageerada macalinka ee imtixaan qaadista iyo go'aan qaadasho xog ku salaysan si ay gacan uga geysato la socodka horumarka una xoojiso adeegyada.**
- **Bixinta tababaro dheeraad ah oo gaar ah oo ku saabsan daryeelka xog ogaalka ah ee shoogga; dhaqamada xal kusoo dabaalidda; barashada shucuurta-bulshonimada; buuxinta baahiyaha ardayda qaadanaysa waxbarashada gaarka ah; habab loogu talagalay fasallada leh luuqado badan oo guriga looga hadlo; iyo hawlaha waxbarashada oo lagu daro muusig, dhaqdhaqaaq, iyo ciyaar.**
- **Hirgelinta xeelado sii haysasho oo wax looga qabto shaqo ka tagista macalinka, sida fursadaha horumarinta shaqada, barnaamijyada aqoonsiga, ama hagaajinnada magdhowga.**

Dhammaan sawirada ku jira soo koobidan oo dhan waxaa leh Seattle Department of Education and Early Learning.